

Carruurtaadu Diyaar ma u Tahay Iskuul?

Sharciga Tallaalka Dugsiyada ee Minnesota

Tilmaameyaal:

- Ogow da'da ilmaha/heerka waxbarasho adigoo u akhriyaya dhanka midig.
- Eeg in ilmuhu tallaalka kasta ka qaatay dhamaan tallaalkada hoos ku taxan ee la calaamadiyey.

Fiiro- Gaar: Saf walba waa in si gooni ah loo akhriyaa, ha isku darin tirooyinka taxan ee ku hoos qoran tallaalka walba.

Tusaalle: Ilmo waliba oo aan da' dugsi gaarin wuxuu u baahanyahay tallaalka oo 4 DTaP ah, ka bacdi markuu dugsi isku diyaarinayana wuxuu u baahanyahay 1 kale oo tallaalka DTaP ah, isku-dar waa 5 (ma' aha 9)

	Hep B cagaarshow nooca B	DTaP/Td/Tdap diphtheria, teetano, xiiq (xiiq-dheer)	Polio dabayl	MMR jadeeco, qaamow-qashiir, jadeeco Jarmal	Hib <i>Feyruuska</i> <i>ifilo-weysada</i> nooca B	Varicella* (bus-bus)
Dugsi kahor (da'da u dhaxeysa 3-5)		✓✓✓✓	✓✓✓	✓	Ugu yaraan ✓	✓
Gaaro da'da lagu bilaabo dugsi	✓✓✓	✓✓✓✓✓ tallaalka 5aad looma baahna hadii kii 4aad uu qaatay markuu 4 jirsaday ka dib	✓✓✓✓ tallaalka 4aad ee dabaysha looma baahna hadii kii 3aad uu qaatay markuu 4 jirsaday ka dib	✓✓		✓
7 jir ilaa fasalka 6aad		Ugu yaraan ✓✓✓	Ugu yaraan ✓✓✓	✓		
Fasalka 7aad ilaa fasalka 12aad	✓✓✓ fasalka 7aad oo keliya***	Ugu yaraan ✓✓✓ Hal talaal ayaa lagu darayaa marka ay jiraan 11-12 sano**	Ugu yaraan ✓✓✓	✓✓		✓ fasalka 7aad oo keliya

* Tallaalka Varicella looma baahna hadii cudurka busbuska uu ilmaha horay ugu dhacay.

** Hadii canug la siiyo tallaalka Td marka uu jiro 7-10 sano uma baahna tallaalka kale marka uu jiro 11-12 sano. Haseyeeshee, waa in la siiyaa tallaalka kale oo Td ah toban sano kadib markii ay tallaalkii ugu danbeeyey ee Td ah qaateen.

*** Tallaalka cagaarshowga B ga ah oo kale oo laba jeer la kala qaadanayo ayaa la siin karaa caruurta da'doodu u dhaxeysa 11 ilaa 15 sano jirka.

Si dugsi looga dhigto Minnesota, ardaydu waa in ay keenaan dugsiyada caddeyn tusinaysa in ay qaateen tallaalkada ama ay ka buuxiyaan dugsiyada foomka ka kaftoonka ee sharciga ah.

Waalidka waxay ka xareyn karaan rugtooda caafimaadka codsiga ka dhaafidda tallaalka ama go'aanka diidmada tallaalka ee uu ogsoon yahay waxa uu diidayo oo ay sixiixeen waalid/mas'uul sharci ah isla markaana nootaayo la saaray.

Tallaalkada kale ee lagula talinayo caruurta iskuulada dhigata, laakiin aanu ka rabin Shuruucda Tallaalka ee Iskuulka:

- Tallaalka infalawansada (flu) - Sanad walba caruurta jira 6 bilood ilaa 5 sano jirka ah iyo dhamaan caruurta qaba cudurada gaamura sida neefta iyo sokoroowga.
- Tallaalka Meningococcal da'da 11-18 jirka.
- Tallaalka Human papillomavirus (HPV) gabdhaha jira 11-18 sano.